**Dastuurka Dawladda Federaalka**

Golaha Xukuumadda Dawladda Puntland ayaa ku tilmaamey Dastuurka KMG ah ee Dawladda Federaalka mid leh ahmiyad weyn, isla markaana uu yahay dastuurka dhameystirkiisu shaqada ugu weyn ee hortaal xukuumadda federaalka Soomaaliya, sidaa darteed loo baahan yahay in si sal-balaaran oo ku dhisan is-aaminaad in ay uga wada qeyb-galaan dhammaan Maamulada Soomaaliya

**Warbixino**

Madaxweyne kuxigeenka Dawladda Puntland ayaa ka warbixiyey deegaanka Gosol ee degmada Buurtinle oo uu kormeer kusoo sameeyay, ka dib markii ay go'doomiyeen Roobkii Gu'ga, sidoo kale waxaa Wasaaradda C/fimaadka laga dhageystay shaqooyin ay ka soo qabteen Gobollada Sanaag iyo Heylaan

**Xafiiska Afhayeenka Madaxtooyada Dawladda Puntland**
**E-mail: - spk.oop@plstate.so, spofgovpl@gmail.com**
**Website: www.plstate.so**